

**Marka aad ka imaysid bari iyo jidka I-94:** I-94 uga bax Cedar Avenue (Exit 234C), u leexo bidix. Raac Cedar Avenue (Cedar waxa uu u leexda midig marka la gaadho ishaarada taraafigga) ilaa E 26th Street ka dibna u leexo midig. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** qaado 26th Street west. Wax yar marka aad dhaaftid 10th Avenue, gal leexashada bidixda ee ugu horeysa si aad u gashid baarkanka shaqaalaha leh ee ku yaala inta u dhexeysa 10th Avenue iyo Chicago Avenue. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, oo u leexo midig. Sii soco ilaa Franklin Avenue, oo u leexo bidix. Midig u gal 5th Avenue. Waqooyi ugu sii soco 5th Avenue ilaa barta laga galo I-94 East. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** qaado 26th Street ilaa Chicago Avenue ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa E 28th Street ka dibna u leexo bidix. Mar kale u leexo bidix ilaa goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax baarkinka, oo bidix u gal S 10th Avenue ka dibna sii soco ilaa E 26th Street. Bidix ugu leexo 26th Street ka dibna sii soco ilaa Chicago Avenue. Midig ugu leexo Chicago Avenue. Sii soco ilaa Franklin Avenue, ka dibna bidix u leexo. Midig ugu leexo 5th Avenue. Waqooyi ugu sii soco 5th Avenue ilaa barta laga galo I-94 East.

**Marka aad ka imanaysid Waqooyi iyo I-35W:** Sababta oo ah biriijka ama buundada I-35W ee dhacday, isticmaal leexadka ay ku talisay Wasaaradda Gaadiidka ee Minnesota. Adiga oo ka baxaya I-35W, gal Hwy 280 south oo raac ilaa west I-94. Ka bax I-94 adiga oo ka baxaya Cedar Avenue (Exit 234C), u leexo bidix. Raac jidka Cedar Avenue (Jidka Cedar midig ayuu u leexda marka la joogo ishaaradda ama nalalka taraafigga) ilaa E 26th Street ka dibna u leexo midig. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** qaado 26th Street west. Wax yar marka aad dhaaftid 10th Avenue, gal leexashada bidix ee ugu horeysa si aad u gashid baarkinka shaqaalaha leh ee Piper ee ku yaala inta u dhexeysa 10th Avenue iyo Chicago Avenue. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, u leexo midig. Sii soco ilaa Franklin Avenue, u leexo bidix. Midig u gal 5th Avenue. Waqooyi ugu soco 5th Avenue ilaa barta laga galo I-94E. Ka wareeg I-94E, oo gal 280 north ilaa I-35W north. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** qaado 26th Street ilaa Chicago Avenue ka dibna bidix u leexo. Sii soco ilaa E 28th Street ka dibna bidix u leexo. Mar kale bidix u leexo oo gal goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax baarkinka, adiga oo bidix ugu leexanaya S 10th Avenue, sii soco ilaa E 26th Street. Bidix ugu leexo 26th Street siina soco ilaa Chicago Avenue. Midig u gal Chicago Avenue. Sii soco ilaa Franklin Avenue, bidix u leexo. Midig u gal 5th Avenue. Waqooyi u sii soco ilaa 5th Avenue ilaa barta galitaanka I-94E. Ka wareeg I-94E, oo gal Hwy 280 north ilaa I-35W north.

**Marka aad ka imanaysid waqooyi-bari iyo I-94:** Ka bax I-94 adiga oo ka baxaya Hiawatha/Highway 55 Exit (Exit 234A). Raac Hiawatha/Highway 55 ilaa E 26th Street. Midig u gal 26th Street. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** qaado 26th Street west. Wax yar marka aad dhaaftid 10th Avenue, gal leexashada bidix ee ugu horeysa si aad u gashid baarkinka shaqaalaha leh ee Piper ee ku yaala inta u dhexeysa 10th Avenue iyo Chicago Avenue. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa 28th Street, ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa Hiawatha/Highway 55, u leexo bidix oo raac ilaa barta laga galo I-94 West. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** qaado 26th Street ilaa Chicago Avenue ka dibna bidix u leexo. Sii soco ilaa E 28th Street ka dibna bidix u leexo. Mar kale bidix u leexo oo gal goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax baarkinka, oo midig u gal S 10th Avenue ka dibna sii soco ilaa E 28th Street. Bidix u gal 28th Street oo raac ilaa Hiawatha/Highway 55, bidix u leexo oo raac ilaa barta laga galo I-94 West.

**Marka aad ka imanaysid galbeed iyo I-394:** Raac I-394 ilaa I-94 East (Exit 8B). Ka bax I-94 adiga oo ka baxaya Hiawatha/Highway 55 Exit (Exit 234A). Raac Hiawatha/Highway 55 ilaa E 26th Street. Midig u gal 26th Street. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** qaado 26th Street west. Wax yar marka aad dhaaftid 10th Avenue, gal leexashada bidix ee ugu horeysa si aad u gashid baarkinka shaqaalaha leh ee Piper ee ku yaala inta u dhexeysa 10th Avenue iyo Chicago Avenue. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa 28th Street, ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa Hiawatha/Highway 55, u leexo bidix oo sii soco ilaa barta laga galo I-94 West. Raac I-94 West ilaa I-394 West. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** qaado 26th Street ilaa Chicago Avenue ka dibna bidix u leexo. Sii soco ilaa E 28th Street ka dibna bidix u leexo. Mar kale bidix u leexo oo gal goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax

baarkinka, oo bidix u gal S 10th Avenue ka dibna sii soco ilaa E 28th Street. Bidix u gal 28th Street oo raac ilaa Hiawatha/Highway 55, Bidix u leexo oo raac ilaa barta laga galo I-94 West. Raac I-94 West ilaa I-394 West.

**Marka aad ka imanaysid koonfur iyo I-35W:** Ka bax I-35W adiga oo ka baxaya 31st Street/Lake Street Exit (Exit 15). U sii soco waqooyi wadada xagga hore (taasoo ah South 2nd Avenue). Midig u gal E 28th Street siina soco ilaa Chicago Avenue. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** ka gudub Chicago Avenue ka dibna bidix ugu leexo S 10th Avenue (oo hal bologo/sekad ka shisheeya Chicago Avenue). U sii soco waqooyi jidka 10th Avenue ilaa ishaaradda taraafigga ee ku taala E 26th Street, bidix u gal 26th Street ka dibna isla markiiba bidix ugu leexo baarkinka shaqaale leh ee Piper Building. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, ka dibna u leexo bidix. Raac Chicago Avenue ilaa E 35th Street, ka dibna u leexo midig. Sii soco oo dul mar jid-goboleedka (interstate) ka dibna isla markiiba bidix ugu leexo barta laga galo I-35W South. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** ka gudub Chicago Avenue isla markiiba bidix u gal goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax baarkinka, oo bidix u gal S 10th Avenue. Marka aad joogtid E 26th Street, bidix u leexo siina soco ilaa Chicago Avenue. Bidix u gal Chicago Avenue, siina soco ilaa E 35th Street ka dibna midig u leexo. Sii soco oo dul mar jid-goboleedka (interstate) ka dibna isla markiiba bidix ugu leexo meesha laga galo I-35W South.


**Marka ka imanaysid koonfur-bari iyo Hiawatha/Highway 55:** Bidix uga bax Hiawatha/Highway 55 oo gal E 26th Street. ■ **Haddii aad booqanaysid Piper Building,** raac 26th Street west. Wax yar marka aad dhaaftid 10th Avenue, gal leexashada bidix ee ugu horeysa si aad u gashid baarkinka shaqaalaha leh ee Piper ee ku yaala inta u dhexeysa 10th Avenue iyo Chicago Avenue. **Haddii aad ka tagaysid Piper Building:** Ka bax Chicago Avenue, ka dibna u leexo bidix. Sii soco ilaa E 28th Street, ka dibna u leexo bidix. Raac 28th Street ilaa Hiawatha, ka dibna u leexo midig. ■ **Haddii aad booqanaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn,** raac 26th Street ilaa Chicago Avenue, bidix u leexo. Sii soco ilaa E 28th Street ka dibna bidix u leexo. Mar kale bidix u leexo oo gal goobta cisbitaalka. **Haddii aad ka tagaysid Heart Hospital (Cisbitaalka Wadnaha) ama cisbitaalka weyn:** Ka bax baarkinka, oo midig ugu leexo S 10th Avenue. Marka aad joogtid E 28th Street, bidix u leexo. Raac 28th Street ilaa Hiawatha, midig u leexo.



**Fadlan la soco:** Maababka iyo fariimuhu way isbeddeli karaan sababta oo ah dhismaha ay wado Wasaaradda Gaadiidka ee Minnesota (Minnesota Department of Transportation). Si aad u heshid warkii ugu dambeeyay, tag barta [www.511mn.org](http://www.511mn.org) ama wac teleefonka fariimaha ee Abbott Northwestern oo ah 612-863-5550. Waxa kale oo aad koobiga maabkan ka heli kartaa rugtayada internetka oo ah – [www.abbottnorthwestern.com](http://www.abbottnorthwestern.com).

# Ku Soo Dhawow Abbott Northwestern Hospital

Tilmaan-bixintan goobeed waxa loogu talagalay inay kaa gargaarto sidii aad si fudud oo dhakhso ah intii suurogal ah u heli lahayd Cisbitaalka Abbott Northwestern. Haddii aad u baahan tahay tilmaamo dheeraad ah oo aad ku timaadiid goobtan, ha ka gaaabsan inaad weydiisid shaqaale ama tabaruce.



## TUSMADA

- P** BAARKIN
- V** BAARKINKA LEH SHAGAALAAHA BAABUUR-DHIGISTA
- E** CISBITAALKA WEYN DHINACA BARI
- W** CISBITAALKA WEYN DHINACA GALBEED
- H** CISBITAALKA WADNAHA
- SK** SISTER KENNY® REHABILITATION INSTITUTE
- GOOBTA BUKAANKA LAGA QAAADO**
- JIDKA SARE**
- PB** PIPER BUILDING
- WB** WASIE BUILDING
- HW** HARRIET WALKER BUILDING
- EB** EDUCATION BUILDING

## QAYBAHA

Goob	Dhisme	Dabaq
Qaybta Gargaarka Degdegga	H	1
Qaybta Raajada ee Weyn	E	1
Qaybta Bukaankii-jifka Caafimaadka Maskaxda	SK	3 & 4
Kiliiniga Wadnaha ee Minneapolis	H	2
Kiliiniga Culunta Maskaxda	PB	3
Qaybta Bukaankii-jifka ee Culunta Maskaxda	H	8
Qaybta Bukaankii-jifka Lafaha	H	7 & 8
Xarunta Sawiridda Bukaankii-socodka	SK	1
Qaybta Bukaankii-jifka Laf-dhabarta	H	7
Machadka Kaansarta ee Virginia Piper	PB	3, 4 & 6
Xarunta Daryeelka/Dhalmada ee Haweenka	W	6

## QAYBAHA

Goob	Dhisme	Dabaq
Dhigista	E	1
Qaadista Bukaanka	P	2
Shaqaale Baarkin (Irida Weyn)	E	1
Shaqaale Baarkin (Piper Building)	PB	1

## JIFKA HABEENKII

Meel la seexdo habeenkii waxa laga heli karaa hoteelka magaalada dhexdeeda ee la yidhaahdo 'Sheraton Minneapolis Midtown Hotel' oo la deris ah cisbitaalka Abbott Northwestern (eeg maabka ku yaala dhabarka). Hoteelka Sheraton waxa uu qiime la dhimay siiyaa bukaanka cisbitaalka iyo booqdeyaasha. Cisbitaalka iyo hoteelka waxa isku xidha jid meel sare mara (skyway), waxana martida hoteelku isu diiwaangalin karaan adeeg qaadis ah. Si aad war u heshid ama u sii qabsatid boos, fadlan soo wac 612-821-7600 ama (wicis bilaash ah) 877-508-0123.

## Baarkin

Goob baarkin waxa laga heli karaa goobta baarkinka caadiga ah ee dadweynaha (Public Parking Ramp) ee ka baxda jidka East 28th. Baarkin kale waxa laga heli karaa xagga waqooyi (North Parking Ramp) ee ka baxda jidka East 26th Street ee ku xiga goobta Minneapolis ee Cisbitaalada Caruurta iyo Kiliniyada Minneapolis (Children's Hospitals and Clinics of Minnesota). Baarkinka loogu talagalay naafada waxa laga heli karaa dabaqa E ee baarkinka caadiga ah ee dadweynaha (Public Ramp) iyo dibadda Machadka Dhaqancelinta (Sister Kenny Rehabilitation Institute).

Baarkinka leh shaqaale baabuur-dhigis **V** waxa la heli karaa Isniin ilaa Jimce. Bukaanka iyo booqdeyaasha cisbitaalka weyn (Main hospital) iyo Machadka Dhaqancelintu (Sister Kenny Rehabilitation Institute) waxay heli karaan baarkinka leh shaqaalaha baabuur-dhigista laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 7 fidnimo. Baarkinka ku yaala Piper Building waxa loogu talagalay kaliya bukaanka iyo booqdeyaasha Piper Building.



800 East 28th Street  
Minneapolis, MN 55407-3799  
612-863-4000

[www.abbottnorthwestern.com](http://www.abbottnorthwestern.com)